**Waxaad dhowaan warqad ku heli doontaa sanduuqa boostada**

Toddobaadyada soo socda, waxaad sanduuqa boostada ku heli doontaa casuumaad loogu talagalay baaritaanka kansarka mindhicirka (koloskoobi).
Ujeeddada baaritaanka waa in lagu helo kansarka mindhicirka marxalad hore, si ay u sahlanaato in la daweeyo.
Baaritaanku sidoo kale waxa uu heli karaa burooyin (polyps) laga saari karo si aysan ugu gudbin kansar.

**Baaritaanka kansarka mindhicirka ma adigaa lagugu talagalay?**

Haddii aad hadda qabto ama hore u qabtay kansarka mindhicirka, baaritaanku kuuma habboona.
Waad iska saari kartaa adigoo booqanaya www.sundhed.dk ama la xiriiraya Xoghaynta Baaritaanka ee gobolkaaga.

Haddii lagaa daweynayo cudurka mindhicirka ama malawadka, ama si joogta ah laguu sameeyo koloskoobiga, fadlan la xiriir qaybtaada isbitaalka. Qaybtaas waxaa lagugu sheegi doonaa haddii baaritaanka kansarka mindhicirka uu kuu habboon yahay adiga.

**Ma rabtaa inaad wax dheeraad ah ogaato?**

Waxaad wax badan ka akhrisan kartaa baaritaanka kansarka mindhicirka adigoo booqanaya bogga Hay'adda Caafimaadka Denmark: www.sst.dk/screening-tarmkraeft ama adigoo iska baadhaya QR-koodhka ku yaalla geeska hoose ee midig.
Buug-yarahani waxa uu ku qoran yahay afafka: Danish, Ingiriis, Carabi, Turki, Urdu iyo Soomaali.

**Su'aalo ma qabtaa?**

Haddii aad qabto su'aalo, fadlan la xiriir Xoghaynta Baaritaanka ee gobolkaaga.

Salaan sharaf leh,
Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Nordjylland, tel.: 97 64 17 12
Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Midtjylland, tel.: 78 42 01 70
Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Syddanmark, tel.: 79 40 67 85
Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Sjælland, tel.: 56 51 28 28
Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Hovedstaden, tel.: 38 67 17 17

REGION NORDJYLLAND – i gode hænder · midt regionmidtjylland · Region Syddanmark · REGION SJÆLLAND – vi er til for dig · REGION H Region Hovedstaden